

KU NOQO RABBIGAAGA

لا صلاة لا حياة

(Salaad la'aan waa nolol la'aan)

Qoraaga: CABDIMAALIK MUKHTAAR ADDOW

Tel: +252 61 445 0123

TUSMADA BUUGGA

Mahadnaq	3
Hordhac: Maalin Cusub iyo Bog Cusub	4
Maxay Salaaddu Muhiim u Tahay?	5
Furaha Salaadda (Nadiifnimada)	9
Diyaargarowga Ka Hor intaanad Tukan	13
Sida loo Tukado Tillaabo-Tillaabo	16
Axkaamta iyo Shuruucda Salaadda	21
Gunaanad: Dardaaran iyo Sida loogu Daysto Salaadda	24

BOGGA 3

MAHADNAQ

Mahad iyo ammaan oo dhan waxay u sugnaatay Allahayga kawanka dhan u naxariista, ee inoo fududeeyey qoraalka iyo dhammaystirka buuggan yar ee xambaarsan farriinta culus. Nabadgelyo iyo naxariis ha u dhowaato Nabigeenna Muxammad ah (CSW), kii dadka ka bixiyey gudcurka jahliga ee u horseeday iftiinka iimaanka iyo salaadda.

Waxa aan si gaar ah oo kalsooni iyo jaceyl ku jiro u mahadcelinayaa waaliddiintayda qaaliga ah ee isoo koriyey, daryeelka iyo tarbiyada toosan ee ay isoo siiyeen ayaana keentay inaan maanta halkan taagnaado oo aan wax u qoro bulshada. Sidoo kale, waxaan u mahadcelinayaa macallimiintayda sharafta leh ee igu bixiyey aqoonta iyo garashada, iyo saaxiibada dhabta ah ee habeen iyo dhawr igu dhiirrigelinayey inaan farriintan muhiimka ah u gudbiyo dhalinyarada Soomaaliyeed ee la dhibaataysan daciifnimada iimaanka iyo salaad la'aanta.

Ugu dambeyn, waxaan si mug leh u mahadcelinayaa adiga qaaliga ah ee buuggan akhriyaya. Gacantaada oo uu soo galo buuggani, dib u akhriskaaga, iyo gaadhsiinta aad gaadhsiiin doonto asxaabtaada kale waxay qayb ka bahay guusha iyo hadafka buuggan. Waxaan Alle ka baryayaa inuu ficilkan inaga dhigo mid miisaanka xasanaadkeena u cusbeeyo Maalinta Qiyaame, qof kasta oo salaadda ku soo laabtana ajar la mid ah inaga iyo adigaba la ina siiyo gabi ahaanba.

BOGGA 4

HORDHAC: MAALIN CUSUB IYO BOG CUSUB

Walaalkayga qaaliga ah iyo walaasheedda qaaliga ah, buuggan yar ee gacantaada ku jira maaha mid lagugu xukumayo, lagugu canaanayo, ama lagu baadhayo khaladaadkii aad hore u gashay. Midna ha u qaadan in qoraagu iska dhigayo mid kaa fiican ama kaa iimaan weyn. Kani waa gacan naxariis leh oo si hoose lagu soo taagay, iyo baaq ka baxaya qalbi adiga si dhab ah kuu jecel, kuu rajaynaya isbeddel, deggenaansho, iyo badbaado labada duno ah.

Waxaa laga yaabaa inay muddo dhex kugu qaadatay inaad daryeesho salaaddaada. Waxaa laga yaabaa inay nolosha, baraha bulshada, saaxiibada, iyo mashquulkeedu ku maaweeliyeen, ama aad hadda taagan tay meel aad dareemayso culays iyo dambi weyn oo aad leedahay: “Sidee baa la ii cafinayaa anoo intaas oo sano salaad la'aan ahaa?”. Laakiin marnaba ha iloobin, Rabbiga ku abuuray, ku arkayey markaad dambiga galaysay, haddana ku siinaya neefta aad hadda ku neefsanayso, wuxuu leeyahay sifo wax kasta ka weyn: Naxariis aan dhammaad lahayn.

“Kaga bishaaree addoomadayda (ay dambiyadu rabaayadeen) inaanay ka quusan naxariista Alle, sababtoo ah Alle dambiyada dhan waa dhaafaa.”

Salaaddu maaha kaliya dhaqdhaqaaq jidheed ama culays maalinle ah oo lagaa rabo; waa neefta iyo cuntada uu qalbigu ku noolaado. Waa shan jeer oo aad maalinkii ka baxayso dhibka, cadaadiska, iyo walbahaarka adduunka, si aad u hor istaagto Ka kugu abuuray naxariista iyo xasilloonida. Hadii aad dareemayso daciifnimo iyo dhibaato xagga nolosha ah, ogow in meesha ay wax ka khaldan yihiin ay tahay xidhiidhkaaga iyo Alle.

Buuggan yar wuxuu kuu noqon doonaa saaxiib ku hagaya tillaabo-tillaabo, laga bilaabo sida loo nadiifiyo jidhka ilaa aad ka ruxayso dambiyadaada marka aad sujuuddo. Gacanta i sii, wali ma daahdid, inta aad neefsanayso fursad baad haysataa. Aan isla bilaawno safarka cusub ee noloshaada!

BOGGA 5

MAXAY SALAADDU MUHIIM U TAHAY?

Xidhiidhka Tooska ah ee Adiga iyo Abuurahaaga

Nolosha bani'aadamka maanta waxay u qaybsantaa laba qaybood: mid jidheed iyo mid ruuxi ah. Jirkeenu wuxuu u baahan yahay cunto, cabbitaan, iyo hurdo si uu u shaqeeyo, laakiin ruuxa ama qalbigu wuxuu u baahan yahay xidhiidh uu la yeesho Kii abuuray. Salaaddu waa xadhiggaas tooska ah ee isku xidha addoonka daciifka ah iyo Alle (SWT) oo ah Kan wax kasta awooda. Markaad tukanayso, uma baahnid qof kuugu dhawaaqo ama kuu kala turjuma adiga iyo Alle; waxaad si toos ah u hor istaagaysaa Boqorka boqorada, adoo u sheeganaya baahiyahaaga, dhibkaaga, iyo dambiyadaada.

Dhalinyaro badan ayaa maanta dareema kalarnimo (loneliness) in kasta oo ay haystaan boqolaal saaxiibo ah baraha bulshada. Kalarnimadaas waxay ka timaaddaa iyadoo qalbigu uu madhan yahay. Markaad tanaasul u samayso shan jeer maalinkii si aad u tukanayso, waxaad noloshaada galinaysaa nidaam iyo deggenaansho. Nabigeenna Muxammad ah (CSW) wuxuu ahaa kii marka uu dhib ama culays dareemo dhihi jiray: “Bilaalaw, na nafis oo naga yeedhi salaadda.” Taas waxay muujinaysaa in salaaddu tahay meesha keliya ee laga helo deggenaansho dhab ah oo aan adduunka laga iibsan karin.

BOGGA 6

MAXAY SALAADDU MUHIIM U TAHAY?**Sidee Salaaddu u Dawaysaa Walbahaarka iyo Walaca (Stress-ka)?**

Dunidan casriga ah ee aan ku noolahay, dhalinyaradu waxay la kulmaan cadaadis aad u weyn oo dhanka nolosha, shaqada, waxbarashada, iyo mustaqbalka ah. Cadaadiskaas wuxuu dhashaa walbahaar, walac, iyo niyad-jaw joogto ah. Sayniska iyo dhakhaatiirta maskaxda waxay caddeeyeen in qofka marka uu sujuudo, dhiiggu uu si fiican u gaaro maskaxda, taasi oo hoos u dhigta cadaadiska nafsiga ah. Laakiin diin ahaan, sirta ugu weyn ee sujuudda ku jirta waa inaad dhibkaaga oo dhan uga tagayso Kan kawnka dhan maamula.

Markaad tukanayso, waxaad akhrinaysaa Suuratul-Faatixa, waxaadna leedahay: “Adiga kaliya ayaan ku caabudaynaa, Adiga kaligana ayaan kaalmo weydiisanaynaa.” Kelmaddani waxay qofka siinaysaa awood weyn oo ah inaanay jirin dhib ka weyn gargaarka Alle. Salaaddu waxay u shaqaysaa sidii nadiifin nafta laga nadiifiyo wasakhda iyo fakarada xun xun ee nolosha maalinlahu ku reebto. Qofka raba inuu ka baxo wareerka iyo welwelka mustaqbalka, furaha koowaad ee uu u baahan yahay waa inuu hagaajiyo xidhiidhka uu la leeyahay Rabbigiis, bilowguse waa salaadda.

BOGGA 7

MAXAY SALAADDU MUHIIM U TAHAY?

Khatarta ay Leedahay in Salaadda la Dayaco

In kasta oo Alle uu yahay Naxariis-badane, haddana wuxuu inaga digay inaan ka tagno ama aan fududaysano salaadda. Salaaddu maaha doorasho aad markaad rabto tukanayso, markaad rabtana iska dhowrayso; waa faral gabi ahaanba kala saara qofka mu'minka ah iyo qofka kale.

“Heshiiska inaga iyo iyaga noo dhexeeya waa salaadda, qofkii ka tagaana wuxuu u dhawaaday gaalnimada.”

Tani waa hadal culus oo u baahan in dhalinyaradu si dhab ah u dhuuxaan. Waxa kale oo jirta khatar weyn oo nolosha adduunka ah: qofka salaadda ka taga, Alle wuxuu ka qaadaa barakada nolosha, caafimaadka, iyo nafta. Waxaad arkaysaa qof lacag haysta, caan ah, laakiin haddana aan faraxsanayn, naftiisuna ay cidhiidhi ku jirto. Sababtoo ah wuxuu gooyey xadhiggii isku xidhaya adiga iyo Kan farxadda bixiya.

Qiyaamahana, waxa ugu horreeya ee addoonka la weydiin doono waa salaaddiisa; haddii ay u baxdo tii sax ahayd, camalkiisa kale waa u hagaagayaa, haddii ay xumaatana, wuxuu khasaaray gabi ahaanba.

BOGGA 8

MAXAY SALAADDU MUHIIM U TAHAY?

Albaabka Towbada Mar Walba Wuu Furan Yahay

Walaalkayga qaaliga ah, kadib markaad akhrisay khatarta ay leedahay salaad la'aantu, waxaa laga yaabaa inuu shaydaanku kugu shubo niyad-jab ah: “Haddaba adigu mar hore baad khasaartay, dambigaaguna wuxuu weyn yahay.” Taasi waa dabin ka mid ah dabinnada ugu waaweyn ee shaydaanka. Alle (SWT) wuxuu u yeedhaa addoomadiisa dambiilayaasha ah habeen iyo dhawr, wuxuuna ku dhiirrigeliyaa inay u soo laabtaan. Dambi kasta oo aad gashay, xataa haddii aad sanado badan tukan lahayd, haddii aad maanta niyad dhab ah ku soo laabato, Alle wuxuu dambigii hore oo dhan u beddelayaa xasanaad.

Towbaddu waa inaad ka qasatid khaladaadkii hore, aad hadda bilowdo salaadda, waxaadna ku go'aansataa inaanad dib ugu laaban noloshii hore ee mugdiga ahayd. Ma jirto maalin ka qurxoon maanta oo aad bog cusub u furto noloshaada. Buuggan magiciisa oo ah “Ku Noqo Rabbigaaga” waa baaq toos ah; dib u dhigista iska dhaaf, ha dhihin “beri ayaan bilaabi”, sababtoo ah qofna ma oga daqiiqadda ay naftu ka baxayso nolosha adduunka.

BOGGA 9

FURAHA SALAADDA (NADIIFNIMADA)

Waa Maxay Daahirnimadu? (Noloshu waa Nadaafad)

Ka hor intaanad hor istaagin Boqorka Boqorada (Alle SWT), waxa laguu yeedhay inaad iska nadiifiso wasakhda muuqata iyo ta qarsoonba. Diinta Islaamku waa diin ku dhisni daryeelka nadaafadda, Nabigeenna Muxammad ah (CSW) wuxuu yidhi: “Daahirnimadu waa badh ka mid ah iimaanka.” Tani waxay ina tusaysaa in nolosha mu'minka saxda ah ay ka bilaabanto nadaafad. Salaaddu ma ansaxdo qof jidhkiisa, dharkiisa, ama goobta uu ku tukanayo ay wasakh ama nijaaso ku taalo.

BOGGA 10

FURAHA SALAADDA (NADIIFNIMADA)

Tillaabooyinka Wayso-qaadashada Saxda ah

Si ay waysadaadu u noqoto mid dhammaystiran oo waafaqsan sunnada Nabiga (CSW), raac tillaabooyinkan fudud adoo niyadda ka deggena:

1. Niyadda & Bismillah: Marka hore niyadda gasho inaad u wayso-qaadanayso salaad, ka dibna dheh Bismillah.
2. Dhaqidda Gacmaha: Dhaq labada calaq oo gacmahaaga ah ilaa curcurka saddex jeer, adoo faraha dhexgelinaya biyaha.
3. Ambalka (Af-luqluqashada): Biyo afka geli oo ruxrux saddex jeer, adoo iska soo tufaya wasakhda ku dhex jiri karta.
4. Hinfisashada (Sanka-daahirinta): Biyaha sanku ka mari oo si tartiib ah isaga soo hinfis saddex jeer si sanku gudahiisa u nadiifmo.
5. Dhaqidda Wejiga: Dhaq wejigaaga oo dhan saddex jeer laga bilaabo meesha timuhu ka soo baxaan ilaa gadhka hoostiisa, iyo dheg ilaa dheg.

BOGGA 11

FURAHA SALAADDA (NADIIFNIMADA)

Dhammaystirka Waysada

- Dhaqidda Gacmaha ilaa Suxullada: Dhaq gacantaada midig saddex jeer ilaa suxulka ka sarreeya, ka dibna gacantaada bidix si isku mid ah saddex jeer u dhaq.
- Masaxidda Madaxa & Dhegaha: Gacmaha qoyi ka dibna mari madaxaaga laga bilaabo horteeda ilaa daanta dambe, hal mar oo kaliya. Ka dibna farahaaga mari dhegahaaga gudahiisa iyo dibaddoodaba.
- Dhaqidda Lugaha: Dhaq lugtaada midig saddex jeer ilaa canqowga ka sarreeya, adoo hubinaya inay biyuhu gaareen faraha dhexdiisa, ka dibna lugta bidix aad saddex jeer u dhaq si dhammaystiran.

Markaad dhammaystirto, akhri ducadan weyn ee albaabada jannada kuu furaysa:

“Ashhadu an la ilaha illallah wahdahu la sharika lah, wa ashhadu anna Muhammadan abduhu wa rasuluh. Allahumma ij'alni mina tawwabiina wa ij'alni minal mutatahiriin.”

BOGGA 12

FURAHA SALAADDA (NADIIFNIMADA)

Wixii Waysada Jabiya

Si aad u hubiso in salaaddaadu sax tahay, waa inaad taqaano waxyaabaha buriya waysada ee u baahan inaad dib u wayso-qaadato:

- Wixii labada jid ka soo baxa: Sida kaadida, saxarada, iyo dabaysha ka soo baxda dhabarka.
- Hurdada culus: Hurdada aad dhabarka u seexato ee aad dareenka gabi ahaanba ku lumineyso.
- Miyir doorsoonka: Sida suuxdinta ama dawakhaad weyn oo qofka ka lumisa garaadka iyo miyirka nafta.
- Taabashada xubinta taranka: Haddii qofku si toos ah oo aan dhar u dhexeyn ku taabto calooshiisa gacanta.

Haddii ay mid ka mid ah waxyaabahan kugu dhacaan, si fudud u soco oo dib u soo wayso-qaado, ha dhihin “salaadda ayaan iska dhammaysanayaa”, sababtoo ah salaad la'aan wayso ma jirto.

BOGGA 13

DIYAARGAROWGA KA HOR INTAANAD TUKAN

Shuruudaha Salaadda (Tiirarka hordhaca ah)

Ka hor intaanad gallin falalka salaadda dhabta ah, waxa jira shuruudo dhowr ah oo haddii laga tago ay salaaddu gabi ahaanba burayso. Shuruudahani waxay u taagan yihiin ixtiraamka iyo nidaamka ay diinteenu leedahay. Qofka dhalinyarada ah ee raba inuu nolosha toosnaanta ku soo laabto, waa inuu marka hore hubiyaa saddexdan qodob ee muhiimka ah:

1. Waqtiga Salaadda oo la galo: Salaaddu waxay leedahay waqtiyo go'an oo aan la hordhici karin dibna loo dhigi karin si ula kac ah. Alle wuxuu yidhi: "Salaaddu waxay ku tahay mu'miniinta faral waqtiyeysan."
2. Daahirnimada jidhka, dharka, iyo goobta: Sidii aan hore u soo sheegnay, waa inaysan meelna ku oollin nijaaso muuqata ama mid qarsoon.
3. U jeesashada dhanka Qiblada (Kacbada): Meel kasta oo aad adduunka ka joogto, wejigaaga iyo jidhkaaguba waa inay u jeestaan dhanka Baytullah.

BOGGA 14

DIYAARGAROWGA KA HOR INTAANAD TUKAN

Asturidda Cawrada (Qaabka labiska saxda ah)

Asturidda cawradu waa xishoodka iyo aadaabta koowaad ee qofka laga rabo marka uu isku diyaarinayo inuu la kulmo Rabbigiis. Dhalinyaro badan ayaa maanta qaata dhar aad u kooban ama aad u dhuuban marka ay tukanayaan, taasi oo halis gelin karta ansaxnimada salaaddooda. Diintu waxay si cad u kala sheegtay cawrada wiilka iyo gabadha:

- Cawrada Wiilka (Ninka): Waxay ka bilaabataa xundhurta ilaa laga gaaro jilibka. Laakiin sharafta salaadda awgeed, maaha in ninku iska tukado isagoo garbuhu u qaawan yihiin haddii uu dhar haysto. Waa in la xidhtaa dhar asturan oo nadiif ah.
- Cawrada Gabadha (Haweenka): Gabadha marka ay tukanayso jidhkeeda oo dhan waa cawro, marka laga reebo wejiga iyo labada calaacalood ee gacmaha. Waa in dhar weyn, dhumuc leh (aan khafiif ahayn), oo aan jidhka qeexayn la xidhtaa si ay salaaddu u noqoto mid dhammaystiran.

BOGGA 15

DIYAARGAROWGA KA HOR INTAANAD TUKAN

Sida Qalbiga Loogu Diyaarsho Salaadda (Kushuuca)

Badanaa dhalinyaradu waxay ka cabanayaan: “Waan tukadaa laakiin maskaxdaydu waxay jirtaa baraha bulshada ama suuqa.” Kushuucu (deggenaanshaha qalbiga) maaha wax si iska ah ku yimaada, waa mid u baahan diyaargarow maskaxeed ka hor intaanad oran Allahu Akbar. Ka hor intaanad tukan, istaag daqiiqad oo weydii naftaada: “Aynaan hor istaagayaa maanta?”

Markaad ogaato inaad hor taagan tahay Kii ku abuuray, ku siiyey caafimaadka, noloshana kuu xukumaya, waxaa qalbigaaga geli doona cabsi iyo ixtiraam dhab ah. Iska dami moobaylka, ka fogow meelaha buuqa ah, oo isku diyaari inaad la hadasho Saaxiibkaaga ugu weyn ee dhibkaaga oo dhan xallin kara. Diyaargarowgan nafsiga ah wuxuu keenayaa in salaaddaadu noqoto mid dhadhan leh, oo dambi dhaaf iyo deggenaansho ku dhaxal siisa naftaada.

BOGGA 16

SIDA LOO TUKADO TILLAABO-TILLAABO

Niyadda iyo Takbiirtul-Xraamta (Bilowga nolosha cusub)

Markaad dhammaysato waysada, soona istaagto adoo u jeeda dhanka Qiblada, waxa ugu horreeya ee lagaa rabo waa Niyadda. Niyaddu waa ficil qalbi, uma baahnid inaad afka ka tiri (sida inaad dhihi: waxaan u tukanayaa salaad hebel). Kaliya qalbigaaga gariirkiisa ka dhig inaad hadda u taagan tahay inaad u tukato Alle (SWT).

Intaa ka dib, kor u qaad labada gacmood adoo la simaya garbahaaga ama dhegahaaga, ka dibna dheh: “Allahu Akbar” (Alle ayaa wax kasta ka weyn). Kelmaddani waa midda kuu furaysa albaabka salaadda, waxaanay xidheysaa wax kasta oo adduunka jiray. Markaad leedahay Allahu Akbar, ogow in Alle uu ka weyn yahay dhibkaaga, walbahaarkaaga, moobaylkaaga, iyo saaxiibadaada. Gacantaa midig saar taada bidix, kuna laab laabtaada ama xundhurtaada koradeeda, adoo indhahaaga ku jabinaya meesha aad ku sujuudi lahayd.

BOGGA 17

SIDA LOO TUKADO TILLAABO-TILLAABO

Akhriska Suuratul-Faatixa iyo Suurad Kale

Markaad gacmaha isku laabto, waxaad ku bilaabaysaa ducada astaan-furka (Du'a al-Istiftah) oo ah:

“Subhaanaka Allaahumma wa bihamdika, wa tabaaraka ismuka, wa ta'aalaa jadduka, wa laa ilaaha ghayruka.”

Tani waxay qalbigeeda u diyaarinaysaa kulanka culus. Intaa ka dib, waxaad akhrisaysaa Suuratul-Faatixa. Suuraddani waa rukni weyn oo haddii laga tago ay salaaddu burayso. Si tartiib ah u akhri, adoo dhuuxaya kelmad kasta, sababtoo ah marka aad leedahay “Alxamdulillaahi Rabbil 'Aalamiin”, Alle wuxuu samada ka dhihi: “Adoonkaygii waa igu ammaanay.” Markaad dhammaysato Faatixada, dheh “Aamiin”, ka dibna akhri suurad kasta oo kale oo aad ka taqaan Qur'aanka kariimka ah (sida Qul Huwallahu Axad ama Qul Acuudu bi-Rabbil Falaq).

BOGGA 18

SIDA LOO TUKADO TILLAABO-TILLAABO

Rukuuca iyo Is-hoosaysiinta Boqorka

Markaad dhammaysato akhriska Qur'aanka, dheh “Allahu Akbar” adoo fooraraya oo rukuucaya. Gacmahaaga saar labadaada jilib, dhabarkaagana toosi si uu u simmo. Rukuucu waa qaab aad ugu muujinayso Alle inuu Adiga kaa sarreeyo, adiguna aad tahay addoon is-hoosaysiinaya.

Inta aad rukuucsan tahay, dheh saddex jeer: “Subhaana Rabbiyal 'Adhiim” (Waxaa daahir la noqday Rabbigayga weyn). Ka dibna si tartiib ah kor ugu soo kac adoo leh: “Sami'a Allaahu liman hamidah” (Alle waa maqlaa qofkii ammaanay). Markaad toos u istaagto, dheh: “Rabbanaa wa lakal xamd” (Rabbiyow ammaan oo dhan adigaa kuu sugnaatay). Halkan istaag xoogaa ilaa jidhkaagu uu dib ugu soo laabanayo deggenaanshihiisa.

BOGGA 19

SIDA LOO TUKADO TILLAABO-TILLAABO

Sujuudda (Albaabka ugu dhow ee dambi dhaafka)

Dheh “Allahu Akbar” oo u dhac dhanka dhulka adoo sujuudaya. Sujuuddu waa meesha ugu sarraysa ee addoonku ugu dhowaan karo Rabbigiis. Waxaad dhulka dhigaysaa toddoba xubnood: wejigaaga (oo wejiga iyo sanku ku jiraan), labada calaacalood ee gacmaha, labada jilib, iyo faraha labadaada cagood.

Inta aad sujuudsantahay, dheh saddex jeer: “Subhaana Rabbiyal 'Aclaa” (Waxaa daahir la noqday Rabbigayga ugu sarreeya). Halkan waa meesha aad ku tukan karto, dambigana aad ku weydiisan karto Alle, waayo Nabigu (CSW) wuxuu yidhi: “Addoonku wuxuu ugu dhow yahay Rabbigiis marka uu sujuudsan yahay, ee badiya ducada.” Ka dibna kor u fariiso adoo leh “Allahu Akbar”, fadhiga u dhexeeyana dheh: “Rabbigh-fir lii” (Rabbiyow ii dambi dhaaf), ka dibna mar labaad sujuud si isku mid ah.

BOGGA 20

SIDA LOO TUKADO TILLAABO-TILLAABO

Ataxiyaadka iyo Salaama-naqsiga (Gunaanadka salaadda)

Markaad dhammaysto rakcooyinka salaadda (labo rakco, sadex, ama afar sidii ay tahayba), rakcada ugu dambaysa waxaad u fariisanaysaa Ataxiyaadka. Fariiso adoo gacmaha saaraya bowdyahaaga, fartaada murdisada ahna in yar kor u taag adoo tilmaamaya kalinimada Alle.

Akhri Ataxiyaadka oo dhammaystiran: “At-tahiyyaatu lillaahi was-salawaatu wat-tayyibaatu...” ilaa aad ka gaarto marag-furka. Ka dibna ku dar Saliga Nabiga (Salawatul Ibraahimiyyah): “Allahumma salli 'alaa Muhammadin wa 'alaa aali Muhammad...”. Markaad dhammayso, u jeeso dhankaaga midig adoo leh: “Assalaamu 'Alaykum wa Rahmatullaah”, ka dibna dhankaaga bidix u jeeso adoo leh: “Assalaamu 'Alaykum wa Rahmatullaah”. Halkaas waxaa ku dhammaaday salaaddaadii, waxaanay naftaadu heshay bogsiin iyo nabadgelyo cusub.

BOGGA 21

AXKAAMTA IYO SHURUUCDA SALAADDA

Arkaanta Salaadda (Wixii aan marnaba laga tegi karin)

Arkaanta salaaddu waa tiirarka ay salaaddu ku taagan tahay. Haddii aad rukni ka tagto — haba noqoto si ula kac ah ama si halmaansho ah — salaaddaadu ma ansaxayso ilaa aad keento ruknigaas aad ka tagtay. Arkaanta ugu muhiimsan ee ay tahay in dhalinyaradu ogaadaan waxa ka mid ah:

1. Niyadda iyo Takbiirtul-Xraamta: Bilowga salaadda.
2. Akhriska Suuratul-Faatixa: Rakco kasta waa in lagu akhriyo.
3. Rukuuca iyo labada Sujuudood: Oo loo sameeyo si deggena ah.
4. Tuma'niinada (Deggenaanshaha): Inaanad salaadda u tukan si degdeg ah oo aad u dhexayso tillaabooyinka.
5. Ataxiyaadka Ugu Dambeeya & Salaama-naqsiga: Gunaanadka fadhiga.

Haddii aad si dhab ah u barto tiirarkan, waxaad cayshaysaa cibaadadaada adoo kalsooni buuxda qaba.

BOGGA 22

AXKAAMTA IYO SHURUUCDA SALAADDA

Waajibaadka iyo Sujuuda Sahwiga (Wixii halmaamidda ah)

Waajibaadka salaaddu waa waxyaabaha haddii aad si ula kac ah u tagto ay salaaddu burayso, laakiin haddii aad si halmaansho ah uga tagto lagu saxayo Sujuuda Sahwiga (laba sujuudood oo dheeraad ah oo la sameeyo intaan la salaama-naqsan ama salaama-naqsiga ka dib). Waxa ka mid ah waajibaadka:

- Ataxiyaadka koowaad: Haddii aad u istaagto rakcada sadexaad adoo halmaamay ataxiyaadka dhexe, dib ha u soo fadhiisan, laakiin dhamaadka salaadda sujuud sahwi ah samee.
- Dhammaan Takbiiraha (Allahu Akbar): Marka laga reebo takbiirta koowaad.
- Subhaana Rabbiyal 'Adhiim/Aclaa: Akhrinta rukuuca iyo sujuudda.

Haddii aad isku shakido inaad saddex rakco tukanayso iyo inaad afar tukanayso, ku dhis waxa aad hubto oo ah tirada yar (saddexda), dhammayso salaadda, ka dibna samee sujuuda sahwiga.

BOGGA 23

AXKAAMTA IYO SHURUUCDA SALAADDA

Wixii Salaadda Buriya (Dhaawaca Cibaadada)

Waa inaad aad uga fogaataa waxyaabaha gabi ahaanba baabi'iyaa salaaddaada si aanay dedaalkaaga u khasaarin:

- Cunista iyo Cabbidda: Xataa haddii ay tahay wax yar oo dhex jiifa ilkahaaga oo aad ula kac u liqdo.
- Haddalka ula kaca ah: Inaad qof kale la hadasho adoo tukanaya.
- Dhaqdhaqaaqa badan: Inaad u dhaqanto si aan shaqo ku lahayn salaadda (sida cayaar, dhar hagaajin badan, ama eegidda moobaylka).
- Qosolka codka leh: Qosolka dhawaqa leh wuxuu buriyaa salaadda (laakiin dhoola-cadaynta yar ma buriso).
- Waysada oo dhabata: Inay waysadaadu baxdo adoo dhex taagan salaadda gudaheeda.

BOGGA 24

GUNAANAD: DARDAARAN IYO SIDA LOO TUKADO SALAADDA

Walaalkayga iyo walaasheedda qaaliga ah ee dhalinyarada ah, waxaan halkan ku soo xidhaynaa safarkii quruxda badnaa ee buuggan yar ee “Ku Noqo Rabbigaaga”. Hadafka rasmiga ah ee qoraalkani ma ahayn kaliya inaad akhriso kelmado ku qoran warqad, laakiin waa inaad noloshaada wax ka beddesho maanta wixii ka dambeeya. Saacad kasta oo kugu dhaafta adoo aan tukanayn waa khasaare weyn oo adduun iyo aakhiroba leh. Xasuuso, salaaddu maaha cibaado loogu talagalay dadka khayrka badan oo kaliya, waa badbaadada qof kasta oo dambiile ah oo raba in laga nadiifiyo wasakhda adduunka iyo walbahaarka nolosha.

Si aad ugu daysto, uguna adkaysato salaadda, raac talooyinkan muhiimka ah:

- Maqal oo u Diyaar-garow: Marka aad dhex joogto shaqada ama madaddaalada, haddana aad dhasho dhawaqa Aadaanka, u qaado inuu yahay baaq toos ah oo ka gadhay Rabbigaaga oo kuu yeedhaya. Iska dhaaf wax kasta oo aad gacanta ku hayso, sababtoo ah guusha dhabta ahi waxay taallaa gogosha salaadda.
- Doorro Saaxiibo Fiican: Ka dhigo saaxiibadaada dhow kuwo kugu dhiirrigeliya salaadda, marka waqtigu galona ku xasuusiya. Haddii aad leedahay saaxiib aan tukan, u hadiyey buuggan yar ama u sheeg farriinta ku dhex jirta si aad ajar uga hesho.
- Ha Dib-u-dhigin (Iska Jir Berri): Haddii aad maanta daciifto oo aad salaad ka tagto, iska yiri “berri ayaan soo laabanayaa”, waxaad ogataa in berrito aanay ballan kuu ahayn. Imisa dhalinyaro ah oo asaageena ahaa ayaa saaka xabaalaha ku jira oo rabi lahaa inay hal mar oo kaliya rukuucaan ama sujuudaan? Fursadda aad maanta haysato waa hadiyad qaali ah.
- Badso Ducada iyo Is-hoosaysiinta: Mar walba ka bako Alle inuu qalbigaaga ku sugo diinta, iimaankana kuu sii xoojiyo. Salaaddu waa furaha guushaada, waa deggenaanshaha maskaxdaada, waana iftiinka qabrigaaga.

*Alle ha inaga dhigo kuwo ku adkaysta salaadda, dambigoodana la dhaafo,
kulankeenna xigana ha ka dhigo Jannatul Firdowsa.*